


Minnesota Office of Higher Education  
AASAASADA GARGAARKA  
DHAQAALAHHA




# Sidee Ayaan U Bixiyaa Qarashka Kulliyad?

Haddii aad u moodo inaad goyn karin inaad kulliyad aadid, markale kafakir. Gargaarka dhaqaalaha wuxuu ku caawiyay malaayiin arday ah waxbarashadooda ee dhaafsan dugsiga sare.

*Ka buuxi kaliya hal codsi — [www.fafsa.gov](http://www.fafsa.gov) — si loo go'aansado u qalmidaada ee gargaarka dhaqaalaha qaababka kale duwan.*

# Sidee Ayaan U Codsadaa Gargaarka Dhaqaalaha?

Waxaa hadeer kuu suurto galeyso inaad ka soo wareejisid xogta canshuurta IRS wv ku wareejisid FAFSA haddii aad buuxisid FAFSA wax ka badan labo isbuuc kadib markaad xareysay canshuurahaaga.



Si aad u codsatid, waa inaad buuxisaa Codsiga Bilaashka ah ee Gargaarka Ardayda Faderaalka (FAFSA). Foomka waxaa la heli karaa Oktoobar 1aad onleenka ee [www.fafsa.gov](http://www.fafsa.gov) oo waxaa loo isticmaalaa in lagu codsado Lacagta Gobolka Minnesota, Lacagta Faderaalka Pell, Dqgeda waxbarashada Hindida Minnesota Indian, Deynta Tooska ah, iyo dooqyada gargaarka kale ee badan ee laga heli karo kulliyad gaar ah. Foomka wuxuu u baahanyahay inaad adiga xareysid warbixinta daqliga ku saabsan adiga iyo qoyskaaga iyo hantiyada.

Ardayda aan sharciga laheyn ee u qalmaa Xeerka Riyada Minnesota waxay isticmaali karaan codsiga gargaarka dhaqaalaha gobolka ee laga heli karo: [www.ohe.state.mn.us/MNDreamAct](http://www.ohe.state.mn.us/MNDreamAct)

Ardayda aan sharciga laheyn waxay codsian karaan gargaarka dhaqaalaha Gobolka adiga oo galayo onleenka Xeerka Riyada MN - codsiga Gargaarka Dhaqaalaha Gobolka. Si aad ugu qalantid Lacagta Gobolka MN, codsiga waa in la gudbiyo waqti aan ka dambeynin maalinta 30aad ee xilliga kulliyada. Natiijoyinka codsiga waxaa loo isticmaali karaa inaad u qalantid qiimooyinka qidmada waxbarashada gobolka iyo gargaarka dhaqaalaha gobolka. Kulliyadaha qaarkood iyo jaamacadaha waa inay haystaan aqoon isweedaarsiga loo heli karo ardayda ee la xiriir heerka socdaalka. Waa muhiim in lala eego xarunta ku dano geliyo si aad waxbadan uga baratid deeqda waxbarashada (dugsiga gaarka u ah) suurto galka. Minnesota waxay bixisaa barnaamij deyn ee loo yaqaan Barnaamijka SELF Loan, kaas oo loo heli karo ardayda oo aan laga eegin heerka socdaalka. Codsi gooni ah ayaa loo isticmaalay in lagu codsado SELF Loan, ee laga heli karo dhinaca xafiiska gaarka dhaqaalaha kulliyada. Deyn helayaasha SELF Loan waa inay ahaadaan muwaadin ama shatiga daganaanshaha.

Xeerka Riyada MN codsiga waa in lagu xareeyaa haljeer sannad walboo waxbarasho ardayga waxaa laga diiwaangeliyaa kulliyada.

Xafiisyada gargaarka dhaqaalaha ee kulliyadaha ku dano geliyo waa illo wanaagsan ee warbixinta ee ku saabsan sida loo bixiyo kulliyadooda. Codsashada gargaarka dhaqaalaha qarash maqabo. Adiga oo codsanayo, uma balan qaadin nafsadaada inaad ka qeybgashid kulliyad walba.

**Booqo [www.ohe.state.mn.us/paying](http://www.ohe.state.mn.us/paying) wixii dooqyada liiska kordhin dheeraadka ah ee kulliyada.**

# Tallaabooyinka Aasaaska SHANTA AH (FIVE)

oo lagu codsanayo gargaarka dhaqaalaha

1. Codso gelitaanka oo hal ama kulliyada badan.
2. Ka codso gargaarka dhaqaalaha [www.fafsa.gov](http://www.fafsa.gov) adiga oo isticmaalaya Codsiga Bilaashka ah ee Gargaarka Ardayda Faderaalka (FAFSA) kadib Oktoobar 1. Ardayda aan sharciga laheyn waa inay isticmaalaan codsiga gargaarka dhaqaalaha, oo laga heli karo [www.ohe.state.mn.us/MNDreamAct](http://www.ohe.state.mn.us/MNDreamAct) badelkii FAFSA.
3. Ka codso aqoon deeqda waxbarashada ay bixiyeen kulliyadaha ama illaha kale. Weydii codsiyada ama ka hel onleenka. Eeg bogga onleenka bilaashka ah deeqda waxbarashada sida [www.fastweb.com](http://www.fastweb.com) si aad u raadisid deeqaha waxbarashada gaarka ah.
4. Heli warqada ogolaanshaha kulliyada (waqtiyeynta waa kala duwanyahay).
5. Ka hel waraaqaha kulliyadaha oo tilmaamayo u qalmida gargaarka dhaqaalaha (caadi ahaan Maarso 1 ama hadhowdii, waxay ku xirantahay marka aad xareysay FAFSA-kaaga), oo kaga jawaab sida waafaqsan.

## Noocyadee

oo gargaarka dhaqaalaha ayaa la heli karaa?

**Gargaarka dhaqaalaha wuxuu ku imaadaa dhoor noocyo:**

1. Lacagaha ku saleysan baahida ee ka imaaneyso dowladaha faderaalka iyo gobolka oo an inaad dib u bixin;
2. Deymanka ka imaanayo dowladaha faderaalka gobolka ama shirkadaha gaarka ah ee ah in dib loogu bixiyo si dano ku jirto;
3. Shaqooyinka shaqada-waxbarashada, midkood xarunta ama ka baxsan, ee kuu suurtoogalissaa inaad heshid lacag kaa caawiso qarashaadka ka qaadashada dugsiga;
4. Isku dheelitirnaanta qidmada waxbarashada waxay siisaa qidmada waxbarasho la dhimay ardayda Minnesota ee ka qeybgaleyso kulliyadaha iyo jaamacadaha Wuqooyiga Dakota, Koonfurta Dakota, Wisconsin, Manitoba iyo hal kulliyad ee Iowa; iyo
5. Faa'idooyinka waxbarashada iyo deeqda waxbarashada ardayda leh xaalado gaar ah iyo kartiyo. Tusaalooyinka waxaa ku jiro caawinta daryeelka canuga; faa'idooyinka milatariga; gargaarka mudnaanta buuncooyinka wanaagsan iyo guusha waxbarashada; ama deeqda waxbarashada ku saleysan jinsiga, qowmiyada ama xirfad gaar ah ama xaaladaha nolosha.

**La xiriir kulliyad walba aad u tixgelineysid si aad u ogaatid wax ku saabsan caawinta gaarka u ah iyo deeqda waxbarashada.**

## Halkee ayaan ka heli karaa

warbixin dheeraad ah?

**Minnesota Office of Higher Education waxay ka bixisaa illo kale duwan oo onleenka ah [www.ohe.state.mn.us/paying](http://www.ohe.state.mn.us/paying).**

**Halkaan waxaad ka heleysaa:**

Codsiyada qidmada waxbarashada isku dheelitiran, warbixinta ku saabsan Qorshaha Keydinada Kulliyada Minnesotaiyo barnaamijka SELF Loan.



Codsiyada iyo warbixinta ku saabsan Minnesota iyo gargaarka dhaqaalaha faderaalka.



Warbixinta deymaha canshuurta waxbarashada iyo faa'idooyinka.



Warbixinta kulliyadaha Minnesota, jaamacadaha iyo dugsiyada shaqada oo ay ku jiraan warbixinta xiriirkooda, barnaamijyada la bixiyo, websaydyada qidmada waxbarashada iyo qidmooyinka.


Qiyaasaha gargaarka dhaqaalaha shaqsiga A ee ardayda iyo waaladiinta rabaan inay helaan warbixinta guud ee ku saabsan noocyada gargaarka ee laga yaabo inay u qalmaan.




# Imisa ayuu joogaa kulliyada?

Qarashaadka Ka qeybqaadashada way kala duwantahay kulliyad ku kulliyad. Xirmoda gargaarka dhaqaalaha aad heshay wuxuu sidoo kale ka duwanaan karaa kulliyada aad dooratay. Intaa waxaa dheer qidmada waxbarashada qidmooyinka, waxaa jiro qarashaad oo qolka iyo guddiga, buugaagta iyo qarashaadka kale. Qarashaadkaan dhammaan waa la tixgeliyaa markii kulliyada go'aansato abaalmarinta gargaarkaaga dhaqaale.

## Kulliyada Gobolka - Ka baxsan xarunta aan ku nooleyn guriga\* Guud ahaan \$14,420



## Jaamacada Gobolka - Ee xarunta\* Guud ahaan \$19,548



## Jaamacada Minnesota Twin Cities - Ee Xarunta Guud ahaan \$26,738



## Shaqada Gaarka ah - Ka baxsan xarunta aan ku nooleyn guriga\*\* Guud ahaan \$34,181



## Gaar ah 4-Sanno Kulliyad - Xarunta ah\*\*\* Guud ahaan \$49,107



- Qidmadawaxbarashada iyo qidmooyinka gobolka
- Qolka iyo Guddiga
- Buugaagta iyo qarashaadka kale

\*Qidmada waxbarashada iyo qidmooyinka waxay ayay ku kala duwanyahay shaqsiyaadka qaar ee jaamacadaha gobolka iyo kulliyadaha gobolka.

Qarashaadka waa isku celceliska la miisaamay.

\*\*Qarashaadka waa barnaamijka ugu weyn ee machadka haddii barnaamijka ku saleysanyahay.

\*\*\*Qarashaadka waa isku celceliska la miisaamay ee qidmada waxbarashada oo dhammaan barnaamijyada laga bixiyo machadka

Xogta qidmada waxbarashada ee 2016-2017 sida loo isticmaalay ujeedooyinka lacagta.

Qolka iyo guddiga iyo qarashaadka kale ee 2015-2016.

Minnesota Office of Higher Education ee xogta qidmada waxbarashada; Waaxda Waxbarahada Mareykanka, Sahanka Sifooyinka Machadka oo xogta kale

# Ma jiraan Faa'idooyinka Canshuurta oo aadista kulliyada kuxiran?

Haa. Faa'idooyinka canshuurta faderaalka waxay kugu caawin kartaa tixgelinta ka qeybgalida kulliyada. Faa'idooyinka waxaa ku jiro:

- **Deynta Canshuurta Fursada Ameerikaanka:** Wixii sannadka canshuurta 2016, waxaa kuu suurtoogaleyso inaad sheegatid deynta canshuurta ee soo noqodka canshuurta soo noqodka faderaalka ee \$2,500 oo arday walboo u qalmo.
- **Deynta Canshuurta Waxbarashada Cimriga inta ka dhiman:** Waxaa kuu suurtoogaleyso inaad sheegatid deynta canshuurta oo illaa \$2,000 oo qidmada waxbarashada u qalanta iyo qarashaadka la xiriiro qoyskiiba.
- **Ka jarida Danaha Deynta Ardayda:** Waxaa kuu suurtoogaleyso inaad ka jartid danaha deymaha ardayda ee nafsadaada, xaaskaaga ama ku tiirsadayaasha kale. Ka jarida ugu badan ma gaari karto \$2,500 ee soo noqodka canshuurtaada faderaalka.
- **Caawinta Qidmada waxbarashada Shaqaalaha la siiyay:** Qaar ka mid ah shaqaalaha waxay bixiyaan lacag celinta qidmada waxbarashada iyo qidmada. Sida arday, waxaad uga heli kartaa illaa \$5,250 oo canshuurta faa'idooyinka waxbarashada si bilaash ah badroonigaaga sannad walba. Guud ahaan, waa inaad bixisaa canshuur oo tiro walba ee faa'idada waxbarashada oo aad ka heshid badroonigaaga ee dhaafa \$5,250 sannadka.

Wixii warbixin dheeraad ah ee faa'idooyinka canshuurta faderaalka, kala tasho webesaydka Adeega Daqliga Gudaha ee [www.irs.gov](http://www.irs.gov) oo arag daabacaada #970 aam soo wac (800) 829-1040.



Ku saabsan

## Minnesota Office of Higher Education

Minnesota Office of Higher Education waa hay'ada gobolka heerk gollaha oo siinayo ardayda barnaamijyada gargaarka dhaqaalaha iyo warbixinta lagu caawinayo iyaga inay helaan waxbarashada dugsiga sare dhaafsan. Hay'ada waxay u adeegtaa sida guriga cadeynta gobolka oo falanqeynada xogta, cilmi baarista ee diiwaangelinta waxbarashada dugsiga sare dhaafsan, gargaarka dhaqaalaha, dhaqaalaha iyo isbadelada.

Booqo [www.ohe.state.mn.us/paying](http://www.ohe.state.mn.us/paying) si aad wax badan uga baratid dooqyada oo dhan ee lagu bixinayo kulliyada.

# BARNAAMIYADA GARGAARKA DHAQAALAHA

Lacagaha iyo Barnaamijyada Deeqda waxbarashada	BARNAAMIJKA	ARDAYDA WAXAY KU CODSADAAN	TIRADA	NOOCA ABAALMARINTA	ARDAYDA U QALANTA
	Deeqda Gobolka Minnesota	Buuxi FAFSA ( <a href="http://www.fafsa.gov">www.fafsa.gov</a> ) oo aan ka dambeyn 30ka maalin ee koorsada*	Abaalmarinta isku celcelis waa \$1,857	Sida ku saleysan baahida dhaqaalaha iyo qarashka ka qeybgalida	Ardayda dadka dagan Minnesota (waxaa ku jiro ardayda aan sharciga laheyn ee u qalmo Xeerka Riyada MN), laga diiwaangeliyay ugu yaraan sadex buundo ee waxbarashada ardayga jaamacada ee macmadyada Minnesota ee u qalma. Waa inuu ka qalin jabiyaa dugsiga sare ama u dhiganta ama yahay 17 sanno jir ama ka weyn, ka qeybgalay wax ka yar afar sanno kulliyad oo waa inuu buuxiyaa waajibaadyada deymanka ardayga iyo taageerada canuga.
	Deeqda Federaalka Pell	Buuxi FAFSA ( <a href="http://www.fafsa.gov">www.fafsa.gov</a> )	\$598 to \$5,815 sannadkiiba	Sida ku saleysan baahida dhaqaalaha la muujiyay	Ardayda jaamacada horeysa. Waa inay ahaadaan muwaadinka Mareykanka ama kuwa muwaadinka aan aheyn ee u qalma, aan fullin deymanka faderaalka aoo aan laheyn xukunka daawada iyada oo la helayo gargaarka dhaqaalaha. Ragga waa inay ka diiwaangashnaadaan Adeega La doortay. Waa inuu ahaadaa arday ka qalinjabiyay dugsiga sare.
	Lacagta Faderaalka Dheeraadka ah	Buuxi FAFSA ( <a href="http://www.fafsa.gov">www.fafsa.gov</a> )	Illaa \$4,000 sannadkiiba	Sida ku saleysan baahida dhaqaalaha la muujiyay	Ardayda jaamacada ee ka diiwaangashan ugu yaraan waqti barkiisa. Waa inuu ahadaa muwaadin Mareykan ah ama kuwa aan muwaadinka aheyn ee u qalma. Ragga waa inay diiwaangashanaadaan Adeega La doortay. Mudnaanta la siiyay helayaasha Lacagta Pell. Waa inuu ahaadaa arday ka qalinjabiyay dugsiga sare.
	Lacagta Daryeelka Canuga Wax barashada dugsiga sare dhaafsan ee Minnesota	Xafiiska gargaarka dhaqaalaha xarunta kadib buuxinta FAFSA ( <a href="http://www.fafsa.gov">www.fafsa.gov</a> )*	Illaa \$2,800 canugiiba oo sannad walboo waxbarasho ah haddii laga diiwaangeliyo	Sida ku saleysan baahida dhaqaalaha la muujiyay, cabirka qoyska iyo tirada carruurta	Ardayda dadka dagan Minnesota, waxaa ku jiro ardayda aan sharciga laheyn ee u qalmayo Xeerka Riyada MN, oo ay la jiraan carruurta 12 sanno jirka ama ka yar, ama 14 ama ka yar oo qabo curyaannimo. Ardayda waa in laga diiwaangeliyaa ugu yaraan lix buundooyin ee barnaamijka ardayda jaamacada ama ugu yaraan 1 buundo ee ardayda jaamacada ama barnaamijka xirfada ee machad u qalma oo Minnesota oo aan aheyn helaha faa'idooyinka ka imaanayo Qorshaha Maalgelinta Qoyska Minnesota.
	Barnaamijka Deeqda waxbarashada Hindida Minnesota	<a href="http://www.ohe.state.mn.us/indianscholarship">www.ohe.state.mn.us/indianscholarship</a>	Illaa \$4,000 sannadkiiba ee ardayda jaamacada horeysa iyo illaa \$6,000 oo ardayda qalinjabisay.	Sida ku saleysan baahida dhaqaalaha la muujiyay, iyo tirada lacagaha kale iyo ardayda deeqda waxbarashada way heleysaa	Ardayda MN oo ah ugu yaraan 1/4 abtirsiga Hindida Ameerikaanka oo waxay ka diiwaangashanyihiin machadka MN ee la xisaabiyay. Ardayda jaamacada horeysa waa inay u qalantaa Lacagta Gobolka MN ama Lacagta Faderaalka Pell oo ka diiwaangashan ugu yaraan 3/4 jeer. Ardayda qalinjabisay waa inay muujiyaan baahida dhaqaalaha oo ay ka diiwaangashanyihiin 1/2 jeer.

Barnaamijyada Waxbarashada-Shaqada	BARNAAMIJKA	ARDAYDA WAXAY KU CODSADAAN	TIRADA	NOOCA ABAALMARINTA	ARDAYDA U QALANTA
	Waxbarashada Shaqada Minnesota	Xafiiska gargaarka dhaqaalaha xarunta kadib buuxinta FAFSA ( <a href="http://www.fafsa.gov">www.fafsa.gov</a> )*	Waxaa go'aansaday machadka	Shaqada waqtiga barkiisa ee ku saleysan baahida dhaqaalaha	Ardayda dadka dagan Minnesota waxay ka diiwaangashanyihiin ugu yaraan lix buundooyin koorsadiiba. Waxaa ku jiro ardayda jaamacada, qalinjabiyayaasha, ardayda aan sharciga laheyn ee la siiyay Tallaabada Dib u dhigida ee Imaanshooyinka Carruurnimada (DACA) heerka ogolaanshaha shaqada iyo ardayda waxbarashada. Shaqada maajo hal xili ee la'aanta diiwaanka ama wax ka hooseeyo diiwaangelinta waqtiga barkiisa.
	Waxbarashada Shaqada Faderaalka	Xafiiska gargaarka dhaqaalaha xarunta kadib buuxinta FAFSA ( <a href="http://www.fafsa.gov">www.fafsa.gov</a> )*	Waxaa go'aansaday machadka	Shaqada waqtiga barkeed ee ku saleysan baahida dhaqaalaha; oo aad uga xadidan barnaamijka gobolka	Ardayda jaamacada, ardayda qalinjabisay iyo xirfada. Waa inuu ahadaa muwaadin Mareykan ah ama kuwa aan muwaadinka aheyn ee u qalma. Ragga waa inay ka diiwaangashnaadaan Adeega La doortay. Ardayga waa inuu ka diiwaangashanaadaa ka qeybqaadashada dugsiga.

Barnaamijyada Deymaha	BARNAAMIJKA	ARDAYDA WAXAY KU CODSADAAN	TIRADA	NOOCA ABAALMARINTA	ARDAYDA U QALANTA
	Deynta Ardayga Federaalka Toos ah (Federal Direct)	Buuxi FAFSA ( <a href="http://www.fafsa.gov">www.fafsa.gov</a> )	Wixii ardayda ku tiirsan illaa \$5,500 sannadkiiba ee sannadka koowad ardayda jaamacada, \$6,500 sannadkiiba oo ardayga jaamacada sannadka labaad iyo \$7,500 sannadkiiba ee ardayda jaamacada oo ugu yaraan heerka sannadka sadexaad. Xadeynada deynta way ka sareysaa qalinjabinta, xirfada, ardayda madaxbanaan, iyo ardayda waaladiintooda aan heli karin PLUS Loan.	Deymanka la kabay oo ku saleysan baahida dhaqaalaha; dowlada ayaa bixiso danaha iyada oo ardayda dugsiga joogto, waa in dib loo siiyaa oo looma heli karo ardayda qalinjabinta	Deynta La yareynin tooska ah aan la kabin ee loo heli karo ardayda iyada oo aan jirin baahida dhaqaalaha; dulsaarka danaha deymiyaha isaga oo dugsiga joogo waa in dib loo bixiyaa oo waxaa loo heli karaa ardayda qalinjabisay



# BARNAAMIYADA GARGAARKA DHAQAALAHA

BARNAAMIJKA	ARDAYDA WAXAY KU CODSADAAN	TIRADA	NOOCA ABAALMARINTA	ARDAYDA U QALANTA
Deynta Faderaalka Perkins	Xafiiska gargaarka dhaqaalaha xarunta	Illaa \$5,500 sannadkiiba oo ardayda jaamacada ama \$8,000 sannadkiiba ee ardayda qalinjabinta. La hubi xafiiska gargaarka dhaqaalaha haddii aad u qalantid.	Muddo dheer, deynta dano hooseeyo ee ku saleysan baahida dhaqaalaha, waa in dib loo bixiyaa	Ardayda jaamacada iyo ardayda qalinjabisay ee ka qeybqaadaneyso kulliyadaha. Waa inuu ahaadaa muwaadin Mareykan ah ama mid aahn muwadin aheyn ee u qalma oo aan fullin weynin ama u soo qabin lacag celin oo Ciwaan walba xeerka deynta ama lacagta Waxbarashada Sareyso IV. Ragga waa inay ka diiwaangashnaadaan Adeega La doortay.
PLUS Deynta	Xafiiska gargaarka dhaqaalaha xarunta	Illaa Qarashka guud ee Ka qeybgalka ka yar gargaarka la helay	Danaha go'an, deymanka muddada dheer, waa in dib loo bixiyaa	Waaladiinta dadka ku tiirsan, ardayda jaamacada iyo ardayda qalinjabisay ama barnaamijyada xirfada. Waa inuu ahadaa muwaadin Mareykan ah ama kuwa aan muwaadinka aheyn ee u qalma. Waa inuusan ahaanin mid aan fullin weynin ama u soo qabin lacag celin oo Ciwaan walba xeerka deynta ama lacagta Waxbarashada Sareyso IV. Ragga waa inay ka diiwaangashnaadaan Adeega La doortay.
SELF Deynta	Minnesota Office of Higher Education <a href="http://www.selfloan.state.mn.us">www.selfloan.state.mn.us</a>	Illaa \$20,000 sannadkiiba oo digriiga afar sanno ah iyo barnaamijyada ka qalinjabinta; \$3,500 - \$7,500 sannadkiiba oo barnaamijyo gaaban	La badeli karo- iyo danaha go'an, dooqyada deynta muddada dheer; danaha la bixiyay sadexdii biloodba ee ardayga iyaga oo dugsiga ku jiro, waa in dib loo bixiyaa	Aedayda jaamacada, ardayda qalinjabisay iyo ardayda xirfada ee diiwaangashan ugu yaraan waqtiga barkiisa ee dugsiga u qalmo ee Minnesota, ama dadka dagan Minnesota ee ka diiwaangashan meel ka baxsan dugsiga gobolka. Deyn helayaasha waa inay ahaadaan muwaadin Mareykan ah ama ruqsada danagaanshaha oo u qalmo deynta.

BARNAAMIJKA	ARDAYDA WAXAY KU CODSADAAN	TIRADA	NOOCA ABAALMARINTA	ARDAYDA U QALANTA
Dadka dagan Minnesota ee ka qeybgalayo Wisconsin	Minnesota Office of Higher Education (visit <a href="http://www.ohe.state.mn.us/reciprocity">www.ohe.state.mn.us/reciprocity</a> wixii codsiga onleenka) ama, haddii ka qeybgaleysid kulliyada farsamada Wisconsin, si toos ah uga codso kulliyada		Ardayda waxay siisaa qiimaha ugu sareeyo qidmada waxbarashada dadka dagan ee midkood waxbarashada ka qeybgalay, ama qiimaha isku celceliska ee lagu dalacay machadka gobolka ee guriga u dhigma.	Ku dhawaadkii dhammaan ardayda kulliyada bulshada. Marka laga reebo waa ardayda ku jirto Kulliyada Daawada, Daawada Cudurada Ilkaha ee Jaamacada Wisconsin-Madison ama Milwaukee, iyo baaxada waxbarashada ee dugsi walboo Wisconsin ee ardayda aan daganeyn Wisconsin.
Dadka dagan Minnesota ee ka qeybgalayo Koonfurta Dakota	Dugsiga ka qeybgalka ee Koonfurta Dakota		Ardayda waxay siisaa qiimaha ugu sareeyo qidmada waxbarashada dadka dagan iyo qidmada ee midkood waxbarashada ka qeybgalay, ama qiimaha isku celceliska ee lagu dalacay machadka gobolka ee guriga u dhigma.	Ku dhawaad dhammaan dadka dagan Minnesota ee ka qeybgalayo bulshada machadyada Koonfurta Dakota.
Dadka dagan Minnesota ee ka qeybgalayo Wuqooyiga Dakota	Minnesota Office of Higher Education (visit <a href="http://www.ohe.state.mn.us/reciprocity">www.ohe.state.mn.us/reciprocity</a> wixii codsiga onleenka) ama si toos ah kulliyada laga qeybgalay haddii laga qalin jabiyay dugsiga sare ee Minnesota ee gudaha 12-ka bilood ee la soo dhaafay		Ardayda waxay bixiyaan qiimo ka yar sareeyo qiimaha qidmada waxbarashada dadka dagan Wuqooyiga Dakota.	Ku dhawaadkii dhammaan dadka dagan Minnesota ee ka qeybgalayo machadyada bulshada ee Wuqooyiga Dakota. Barnaamijyada xirfada ee sharciga, farmashiga iyo caafimaadka waa laga reebay.
Aedayda Minnesota ee ka qeybgaleysa Manitoba	Dugsiga ka qeybgalka ee Manitoba	Wuxuu ka duwanyahay qarashka machadka	Ka dhaafida qidmada waxbarashada aan dadka dagan aheyn ee ka qeybqaadashada machadyada Manitoba.	Dadka dagan Minnesota ee ka qeybgalayo Kulliyada Bulshada Assinboine, Kulliyada Jaamacada Booth, Jaamacada Brandon, Jaamacada Canadian Mennonite, Université de Saint-Boniface, Machadka Ganacsiga iyo Faesamada Manitoba, Jaamacada Manitoba, Kulliyada Jaamacada Providence, Kulliyada Bulshada Red River, Jaamacada Winnipeg, ama Kulliyada Farsamada Winnipeg.

# 1

## Aasaasada Gargaarka Dhaqaalaha

Minnesota Office of Higher Education  
1450 Energy Park Drive, Suite 350  
Saint Paul, MN 55108-5227

Tal: 651.642.0567 ama 800.657.3866  
Qadka TTY: 800.627.3529  
Fakiska: 651.642.0675

I-meelka: [info.ohe@state.mn.us](mailto:info.ohe@state.mn.us)

[www.selfloan.state.mn.us](http://www.selfloan.state.mn.us)  
[www.ohe.state.mn.us](http://www.ohe.state.mn.us)

©2017 Minnesota Office of Higher Education